# Ku saabsan Tijaabada

## Maxay tahay sababta Xcel Energy u sameynayso tijaabada qiimaha ee wakhtiga isticmaalka?

Tijaabada ayay ujeedadeedu tahay inay ka faa'iideystaan dhammaan macaamiisha, waxayna ku wargelin doontaa qiimaha korontada mustaqbalka gudaha Minnesota. U wareejinta isticmaalka tamarta saacadaha saxmaddu hooseyso waxay naga caawinaysaa inaad si wanaagsan u maareyno fiilooyinka tamarta, yareynta isticmaalka shidaalka, iyo isticmaalka tamar badan oo la cusbooneysiin karo. Haddii aan ka fogaano kicida sicirka dalabka, waxaan ka fogaan karnaa dhisida warshado cusub oo koronto mustaqbalka, iyadoo yareynaysa kharashka ka baxa qof kasta.

Kharashka korontada wuu sareeyaa si loo soo saaro marka baahidu sarreyso. Inta lagu jiro waqtiyadan marka macaamiisha ay isticmaalayaan tamarta ugu badan, waxaan inta badan u baahanahay inaan ka helno tamar ilaha kharash badan waxaana si badan ugu tiirsanaanaa shidaalka, kuwaasoo si aad ah aan ugu fiicneyn bay'adda.

Haddii macaamiisha ay isticmaali karaan tamar inta u dhaxeysa 3 galabnimo. iyo 8 galabnimo maalmaha asbuuc-yaaqada, waxay haystaan fursad ay ku tashiishaan lacagta.

## Sidee ayaan ku ogaan karaa inaan ku jiro tijaabada?

Waxaad ka dooranaa 17,500 ka qeybgaleyaasha tijaabada oo ka yimid Koonfurta Minneapolis iyo goobaha Eden Prairie. Waxaan aqoonsanay kaqaybgalayaasha tijaabada iyadoo lagu salayay dhowr arrimood, oo ay ku jiraan isticmaalka tamarta iyo nooca guriga.

Waxaan dooranaa goobaha tijaabada innagoo raacayna tallada hoggaamiyeyaasha maxalliga ah, bulshooyinka, iyo Guddiga Korontada ee Dawladda. Waxaan dooneynaa inaan hubinno in kaqaybgalayaasha tijaabada ay u matalaan dhammaan macaamiishayada si siman, sidaa darteed waxaan hubin karnaa casharradii aan ka baranay tijaabadda in lagu dabaqi karo qof kasta.

Waan ku ogeysiin doonaa haddii aad ka mid tahay tijaabadda xaggaaga 2019.

## Miyaa la iga doonayaa inaan wax sameeyo si aan isaga diiwaangeliyo tijaabada?

Lagaagama baahna inaad wax sameysid si aad isku diiwaangeliso. Haddii aad qayb ka tahay tijaabada, waan kula socodsiin doonaa goorta aad filan karto miqyaaska korontaada ee cusub iyo sida loo tashiisho lacagta marka qiimaha cusub dhaqan galo.

## Yaa ka reeban tijaabada?

Waa lagaa reebayaa tijaabada haddii aad:

- Ku tiirsan tahay korontada loogu talagalay qalabka taageerada nolosha
- Ka diiwaangashan tahay qorshaha sicirka gaariga korontada ku shaqeeya

- Ku haysato qalabka korontada qorraxda ka dhaliya saqafkaaga
- Ka diiwaangashan tahay qorshaha Lacag-bixinta Celceliska Billaha ah
- U isticmaashid korontada inaad ku kululeyso gurigaaga
- Haysato adeegga xaddidan ee saacadaha saxmaddu hooseyso

Haddii aadan ku nooleyn goob tijaabo, sidoo kale kama qeybqaadan doontid tijaabada.

### Maxaa dhacayo haddii aan rabin inaan ka qaybqaato tijaabada?

Waad iska deyn kartaa waqti kasta. Kaliya wac 800.895.4999 ama u dir iimayl inquire@xcelenergy.com.

### Waxaan helayaa miqyaas cusub, balse ma helayo qiimaha cusub. Sabab?

Iyada oo qayb ka ah daraasadda tijaabada ah, waxaan u dooran doonaa si kala sooc lahayn macaamiisha si ay u helaan miqyaasyada casriga ah, balse waxay ku sii xiranaan doonaan qiimaha jira inta lagu jiro tijaabada. Kooxdan waxay naga caawisaa qiyaasida sida wax ku oolka ah qiimaha cusub yahay galinada lagu dhiirado isticmaalka tamarta. Haddii aad qayb ka tahay kooxdan, waxaan kugu dhiirogelinaynaa inaad sida caadiga ah u isticmaashid korontada, oo aadan ku sameyn isbeddelo waaweyn caddooyinkaaga isticmaalka tamarta. Intaa waxaa dheer, waxaanu kula socodsiin doonaa sahannada. Inkastoo ka qaybqaadashada sahanka khasab aheyn, wuxuu muhiim u yahay daraasadda.

## Miqyaasyada casriga ah

### Waa maxay miqyaas casri ah?

Miqyaaska casriga ah wuxuu oggolaada xiriir laba dhinacle ah oo u dhaxeeya miqyaaska korontadaada iyo Xcel Energy. Miqyaasyada cusub ee casriga ah waxay ku siinayaan faa'idooyin badan, ay ka mid yihiin oggaanshaha koronto la'aanta ee la wanaajiyay iyo jawaab-celinta, barnaamijyada bogeed ee mustaqbalka kaa caawin kara inaad gaarto go'aamo waxgal ah oo dheeraad ah oo ku saabsan isticmaalkaaga tamarta, iyo barnaamijyada mustaqbalka iyo adeegyada kaa caawin kara inaad tashiilato tamarta iyo lacagta.

### Sidee ayay u shaqeeyaan miqyaasyada casriga ah?

Marka lala barbardhigo miqyaasyada dabiiciga ah, miqyaasyada korontada ee casriga ah ayaa leh faa'iidooyin badan. Miqyaaskaaga jira ayaa adiga iyo Xcel Energy idiin sheegaya inta ay le'eg tahay korontada aad isticmaashid, laakiin ma muujinayo marka aad isticmaalayso korontada. Miqyaasyada casriga ah waxay cabiraan isticmaalka tamartaada shantii daqiiqaba mar. Sidan ayaad ku ogaan kartaa inta ay le'eg tahay tamarta aad isticmaashid iyo wakhtiga aad isticmaashid. Macluumaadkani wuxuu kaa caawin karaa inaad si fiican u fahamto sida aad u isticmaaleyso tamarta wuxuuna kaa caawin karaa inaad gaarto go'aamo waxgal ah oo dheeraad ah. Waxaa intaas dheer, miqyaasyadan cusub ayaa naga caawin doonaan inaan si fiican u maareyno fiilooyinka tamarta, yareynta baahida soo-saarka dheeraadka ah, iyo ka falcelinta koronto la'aanta si dhakhso ah.

## Waa maxay faa'idooyinka miqyaaska casriga ah?

Miqyaasyada casriga ah iyo fiilooyinka korontada waaweyn ee casriga ah waxay awood u leeyihiin…

- **Koronto la'an gaaban**. Tiknoolajidaha fiilooyinka korontada ee casriga ah waxay ogaan karaan koronto la'aanta gurigaaga ama nidaamka weyn ee korontada, iyagoo kaa caawinaya yareynta waqtiga korontadu maqan tahay. Waxaa intaas dheer, waxaad helaysaa ogeysiino degdeg ah marka korontada maqan tahay iyo macluumaad sax ah oo dheeraad ah marka korontadu dib u soo dhacayso.
- **Macluumaad badan oo gaar ah**. Waxaad awoodi doontaa inad aragto inta ay le'eg tahay tamarta aad isticmaalaysid marar badan, taasoo kaa caawin doonta inaad gaarto go'aamo tamareed oo waxgal ah.
- **Qalabyada onlaynka**. Qalabyada onlayka ee mustaqbalka ayaa kaa caawin kara inaad si fiican u fahamtid isticmaalka tamartaada si aad u gaarto go'aamo waxgal ah oo dheeraad ah oo ku saabsan tashiilashada tamarta iyo lacagta.
- **Barnaamijyada mustaqbalka**. Miqyaasyada casriga ah waxay awood u siin doonaan tamarta dheeraadka ah ee suurtagalka ah iyo barnaamijyada lacagta lagu tashiisho mustaqbalka.

## Muxuu ku kacayaa si aan u helo miqyaas cusub oo casri ah?

Ma jiro kharash toos ah oo lagaa rabo.

Miqyaasyada casriga ah iiyo fiilooyinka waaweyn ee casriga ah waxaa ka faa'ideysan doona macaamiisha, balse sida mashruucyada kale waaweyn, faa'idooyinka tiknoolajiyad casriga ah waxay qaadan doontaa waqti ka dib. Kordhin kasta oo la soo jeediyo biilasha macmiilka waa inay ansixiyaan Guddiga Adeegyada Korontada ee Minnessota (Minnesota Public Utilities Commision) iyadoo loo marayo geedi-socodka dawladda.

Rakibeyaasha ka socda Xcel Energy ama qandaraaslaha idman marnaba ma dalban doono ama ma aqbali doono wax lagac-bixin ah.

## Goorma ayaan heli doonaa miqyaas cusub?

Waxaan rakibi doonaa miyaaskaaga cusub goor-uun inta u dhaxaysa Oktoobar 2019 iyo Maarso 2020. Waan ku ogeysiin doonaa taariikhda rakibidaada qadarinta mudan qiyaastii labo bilood ka hor waana ku ogeysiin doonaa marka aan u dhownahay taariikhdaas.

## Sidee ayaa loo sameeyaa rakibidda miqyaaska?

Rakibidda miqyaaska waa mid fudud oo dhakhso ah. Shaqaalaha Xcel Energy oo lebisan ama qandaraasle wada kaarka aqoonsiga ayaa soo garaaci doona albaabkaaga si uu kuu ogeysiiyo inay imaadeen, balse lagaagama baahna inaad guriga joogto ilaa iyo inta aan si badqab ah u heli karno miqyaaskaaga. Rakibidda miqyaaska waxay qaadan doontaa qiyaastii 10 daqiiqo; korontadaada ayaa laga yaaba inay danto wakhti kooban. Marka aan si guul leh u beddelno miqyaaskaaga, waxaan kuu dhaafi doonaa macluumaad aad ku ogaato. Haddii ay jirto arrin naga horjoogsata rakibidda, waxaan kaga tegi goonaa albaab-sur ku qoran lambarka teleefoonka nagala soo xiriiro iyo macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan talaabooyinka xiga.

## Halkee ayaa miqyaaska casriga ah lagu rakibi doonaa?

Miqyaaska casriga ah waxay cabbir iyo qaab isku mid ah leeyihiin miqyaaskaaga jira waxaana lagu rakibi doonaa isla goobta miqyaaskaaga cusub ku rakiban yahay.

## Maxaa la iga doonayaa inaan sameeyo si aan ugu diyaargaroobo rakibaada?

Fadlan hubso in aysan jirin wax xannibaya gelitaanka miqyaaskaaga sida ganjeelada ama albaabada qufulan, eeyda, ama alaabta daaradda taala. Ilaa iyo inta aan si badqab ah u heli karno miqyaaskaaga, lagaagama baahna inaad guriga joogto. Haddii aanan heli karin miqyaaskaaga, waxaan kaga tegi goonaa albaab-sur ku qoran lambarka teleefoonka nagala soo xiriiro iyo macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan talaabooyinka xiga.

## Miyaa adeegayga korontada la goyn doonaa marka aad rakibtaan miyaaskayga cusub ee casriga ah?

Macaamiisha qaar waxaa laga yaabaa inay la kulmaan koronto la’aan kooban. Waan kaa raali gelineynaa wixii lur ah. Rakibeyaashayada ayaa soo garaaci doona albaabkaaga si ay kuu ogeysiiyaan, balse lagaagama baahna inaad joogtid guriga inta lagu jiro rakibidda.

## Miyay Xcel Energy xakamayn doonaan sida aan u isticmaalo korontadayda?

Maya. Miqyaasyada casriga ah, sida miqyaasyada jira, kaliya waxay sheegaan isticmaalka korontada—ma xakameyn karaan qalabka ama waxyaabaha kale yaala gurigaaga. Miqyaasyada cusub waxay awood u leeyihiin inay bixiyaan macluumaadka isticmaalka tamarta inta badan, taasoo awood kuu siinaysa inaad gaarto go’aamo badan oo waxgal leh.

## Miyay miqyasyadayda casriga ah si toos ah u ogeysiinayaan Xcel Energy haddii ay korontada baxdo, ama ma inaan wali wacaa?

Miqyaasyada casriga ah waxay bixiyaan macluumaad ogeysiinaya Xcel Energy koronto la’aanta macmiil walba, balse waa inaad wali ugu sheegtaa koronto la’aantaada telefoonka ama onlaynka.

## Miqyaasyada casriga ah ma u keydiyaan xogtayda si ammaan ah?

Haa. Xcel Energy way ka feejigan tahay ammaanka dhammaan hawlaheenna. Xogta laga ururiyo miqyaasyadaada waxaa ka mid ah baaritaanada loogu talagalay kormeerka shaqeynta miqyaaska iyo macluumaadka isticmaalka korontada. Wax macluumaadka gaarka ah ee macmiilka laguma keydiyo ama laguma gudbiyo miqyaaskaaga. Dhammaan macluumaadka ay isweydaarsadaan miqyaaskaaga iyo shabakadeena waa qarsoodi, geedi-socodka qarsoodigana had iyo jeer waxaa lagu sameeyaa dib-u-eegis iyo wanaajin.

Waan ixtiraamnaa asturnaantaada. Macluumaadka laga ururiyo dhammaan miqyaasyadayada (iyo macluumaad kasta oo gaar ah aad na siiso) waxaa loo adeegsan doonaa kaliya ujeedooyinka sida tooska ah ula xiriira inaan ku siino adeegga tamarta. Marka aan sharraxaad dheeraad ah ka bixinayno Siyaasadeena Asturnaanta, ma iibino ama haddii aan sida kale u dhigo ma shaacino macluumaadka adiga kugu saabsan marka laga reebo iibiyeyaashayada

nagu matala qabashada adeegyada, si aan ugu hoggaansanno shuruudaha sharciga, ama oggolaanshahaaga. Wixii macluumaad dheeraad ah, waxaad ku sameyn kartaa dib-u-eegis Siyaasadda Asturnaanta Xcel Energy ama XcelEnergy.com.

### Miqyaasyada cusub ma ammaan baa?

Haa. Qaybo badan oo ka mid ah miqyaaska casriga ah ayaa la mid ah qaybaha ku jira miqyaaskaaga jira. Miqyaasyada casriga ah waxay siidaayaan shucaac tamar oo heerkeedu hooseeya (ka hooseysa heerka shucaaca telefoonada gacanta ama cunto-diirshaha). Heerkan shucaaca tamarta waxaa ansixiyay Guddiga Xiriirka ee Federaalka (Federal Communications Commission). Miqyaasyada casriga ah waxay gudbiyaan shucaaca tamarta kaliya daqiiqado kooban maalin kasta waxaana tamartaasi wiiqa derbiyada ama qalabyada kale ku teedsan.

### Miyaan iska deyn karaa miqyaaskan casriga ah?

Haa. Fadlan wac 800-895-4999 ama u dir iimayl inquire@xcelenergy.com si aad isaga dhaafto.

Haddii aad doorato inaadan u cusbooneysiin miqyaaska casriga ah, ma awoodi doontid inaad ka qeybgasho tijaabada qiimaha ee cusub oo ma heli doontid fursad aad isugu diiwaangelisid tijaabada mustaqbalka.

## Qiimaha Waqtiga Isticmaalka

### Waa maxay qiimaha iyo wakhtiyada?

| **Waqtiga** | **<u>Qaboobaha</u><br>Oktoobar - Maayo<br>(kiilowaat saacaddiiba)** | **<u>Xagaaga</u><br>Juun - Sitembar<br>(kiilowaat saacaddiiba)** |
|---|---|---|
| **<u>Saacadaha Saxmaddu Sareyso</u><br>3 ilaa 8 galabnimo maalmaha asbuuc-yaaqada** | 19.3¢ | 22.6¢ |
| **<u>Saacadaha Saxmaddu Dhexdhexaad Tahay</u><br>dhammaan saacadaha kale** | 7.5¢ | 9¢ |
| **<u>Saacadaha Saxmaddu Hooseyso</u><br>saqda dhexe ilaa 6 subaxnimo maalin kasta** | 2.8¢ | 2.8¢ |

New Year's Day, Good Friday, Memorial Day, Independence Day, Labor Day, Thanksgiving Day, iyo Christmas Day waxaa laga reebay qiimaha saacadaha saxmada ugu sareyso. Marka fasax cayiman ku soo aado maalin sabti ah, maalinta ka horeyso oo Jimcaha ah ayaa loo

cayimayaa inay tahay maalin fasax ah. Marka fasax cayiman ku soo aado maalin Axad ah, maalinta xigta oo Isniinta ah ayaa loo cayimayaa maalin fasax ah.

## Maxaa dhacayo hadduu biilku kaco?

Celcelis ahaan, waxaan rajaynaynaa in biilasha macaamiisha ugu badnaan ahaadaan sida ay ahaayeen inta lagu jiray tijaabada. Macaamiisha u wareejin kara isticmaalka tamartooda waqti ka baxsan saacadaha saxmadu ugu sareyso ayaa haysta fursad tashiilasho. Waxaan siin doonaa ilaalinta biilka sannadka hore macaamiisha biilashooda kordhaan.

Haddii biilashaada dhammaadka sannadka ugu horeeya, ee tijaabada ay ka badan yihiin 10% in ka sarreeya waxa ay noqon lahaayeen marka loo eego qiimaha caadiga ah, waxaan ku siin doonaa deyn biileed hal mar ah oo u dhiganta qaddarka ka sarreya 10% kaas.

Macaamiisha isku diiwaangeliyay kaalmada tamarta kama arki doonaan wax koror ah biilashooda. Sannadka koowaad ah, macaamiishaas waxay heli doonaan deynta biilka bil kasta si biilasha u noqdaan waxa ay ahaan lahaayeen marka loo eego qiimaha caadiga ah.

## Waa maxay sababta qiimaha tamarta ugu sareeyo xagaaga?

Xilliga dalabka tamarta ugu sareeyo ee fiilooyinka korontada waa xagaaga. Taasi waa marka macaamiisha isticmaalayaan korontada ugu badan. Inta lagu jiro xagaaga, aarkudheeshinka ayaa kordhiya dalabka marka loo eego hawlaha caadiga ah ee guryaha, dhismooyaasha, iyo waxshadaha ganacsiga. Iyadoo ugu wacan tahay dalabka sareya, tamar badan ayaa la abuuraa si loo buuxiyo baahida loo qabo, taasoo sababta kharashka sareya ee qof kasta.

## Waa maxay dalab muxuuna muhiim u yahay?

Dalabku waa qadarka korontada ee loo baahan yahay si loo siiyo dhammaan aaladaha korontada ku shaqeeya ee gurigaada yaala waqti go'an. Inta ay badan yihiin tirada qalabka iyo aaladaha isku waqtiga ka daaran gurigaaga, dalabka korontadaada way sareynaysaa.

Qadarka ugu sarreeya ee korantada, ama dalabka, ay u baahan yihiin macaamiisha oo dhan waqti kasta waxay saameyaan qiimaha aan innagoo dhan bixino. Marka kicida sicirka dalabku aad u sareeyo waqti ka dib, waxaa laga yaabaa inaan dhisno warshado koronto oo dheeraad ah si loo bixiyo qadarka ugu sareeya ee korantada ee loo baahan karo.

Haddii qof walba ka taxaddari waayo isticmaalka korontada si loo yareeyo culeyska la saarayo fiilooyinka, waxaan hadda iska ilaalin karnaa ilaha tamarta ee qaaliga ah waxaana iska ilaalin karnaa dhisida warsho koronto oo cusub mustaqbalka.